WARGELIN KU SAABSAN DOORASHADA GOLAHA WAKILADA EE DEGMOYINKA EE SANNADKA 2008

Finland waxay u qaybsan tahay degmooyin. Dastuurka waddanka ayaa wuxuu dhigayaa in dadka degmada deggen ay iskood u maamulaa degmadooda. Marka arri-maha degmada go'aan laga gaarayo, go'aanka waxaa gaara golaha wakiillada oo ah xubno ay dadka degmada deggan soo doorteen. Golaha wakiilladu waa unugga ugu sareeya ee arrimaha degmada go'aankooda gaara. Dadka xubnaha ka ah golaha wakiillada waxaa lagu soo doortaa doorashada wakiillada degmooyinka, waxaana xilka loo doortaa halkii marba afar sanno oo ah sannadaha kalenderka (sannadka kalenderka = Janaayo ilaa Disembar). Doorashada soo socota ee golaha wakiillada degmooyinka waxaa la qaban doonaa 26.10.2008.

Doorashada golaha wakiillada ee degmooyinka waxaa ka qaybqaadan kara dadka dhalashada Finland leh iyo dadka waddamo kale dhalashadooda haysta ee soo buuxiya shuruudahan hoos ku xusan.

Deegaanka ka tirsan gobolka Ahvenanmaa sannadkan 2008 doorashada wakiillada degmooyinku kama jirto.

1 Qofka xuquuqda u leh inuu codeeyo iyo qofka doorashada isa soo sharixi kara

Doorashada golaha wakiillada ee degmooyinka ee la qabanayo 26.10.2008 waxaa inuu codeeyo xaq u leh, qofka leh dhalashada Finland ama dhalashada waddan kale
oo ka tirsan Midowga Yurub (EU), ama leh dhalashada Island ama Norwey, oo
1) ugu dambayn maalinta doorashadu dhacayso ay u buuxsamayso 18 sano
2) degmada uu ka codaynayaa ay tahay, siduu dhigay sharciga degmo deggenaantu, degmada uu qofku ka tirsan yahay ee 5.9.2008 sacaddu markay tahay 24 (saqda dhexe) ugu jirta diwaanka dadku ku qoran yahay, qofka kale ee ajnebiga ah si uu xaq ugu yeesho inuu codeeyo waa
1) in ugu dambayn maalinta doorashadu dhacayso ay u buuxsantaa 18 sano
2) in degmada uu ka codeynayaa ay ahaato sida uu dhigay sharciga degmo deggenaantu, degmada uu qofku ka tirsan yahay ee 5.9.2008 sacaddu markay tahay 24 (saqda dhexe) ugu jirta diwaanka dadku ku qoran yahay, waana
3) inuu 5.9.2008 saacaddu markay tahay 24 (saqda dhexe) si aan kala go' lahayn Finland gudeheeda ugu lahaa degmo uu ka tirsanaa.

Marmar dhif ah mooyee, sida caadiga ah qofku degmada uu ka tirsan yahay waa degmada uu deggen yahay.

Qofka loo dooran karo inuu xubin ka noqdo golaha wakiillada ee degmada
1) degmadu waa inay ahaataa degmada uu ka tirsan yahay
2) qofku waa inuu doorashadan degmooyinka ee la qabanayo xaq u leeyahay inuu degmo degmooyinka ka mid ah ka codeeyo, waa
3) inuusan ahayn qof kala dhinaansho leh (qof masuul laga yahay).

Hase yeeshee waxaa jira qaar ka mid ah shaqaalaha maamulka qaranka iyo shaqaalaha maamulka oo degmada jagooyin sare ka haya iyo dad kuwaas u dhigma oo aan loo dooran karin inay ka mid noqdaan golaha wakiillada degmada.

2 Diwaanka xuquuqda codeynta

Dadka xuquuqda u leh inay codeeyaan, dowladda ayaa macluumaadkooda ku qorta diwaan la yiaahdo diwaanka xuquuqda codeynta. Qofka loogama baahna inuu isagu si gaar ah wararkiisa ugu gudbiyo diwaanka xuquuqda codeynta. Xafiiska diwaangelinta ee deegaanka (Maistraatti) ayaa ugu dambayn 2.10.2008 qof walba oo codeynta xuquuq u leh oo cinwaankiisa la hayo u dira warqad (ilmoituskortti) loogu sheegayo inuu xaq u leeyahay inuu codeeyo iyo faahfaahin ku saabsan sida loo codeeyo.

3 Sida loo soo sharaxo dadka raba in doorashada golaha wakiillada degmada loo doorto

Doorashada lagu dooranayo golaha wakiillada degmada waxaa dad soo sharaxan kara
1) xisbiyada siyaasadda ee diwaangashan
2) dadka xuquuqda u leh inay codeeyaan ee samaystay urur doorasho (valitsijayhdistys).
Si loo samaysto urur doorasho oo raba inuu qof soo sharaxdo, waxaa loo baahan yahay ugu yaraan toban qof oo degmada deggan oo xuquuq u leh inay codeeyaan.
Laakiin waxaa jira degmooyin yar yar oo loo baahan yahay saddex qof ama shan qof oo keliya oo degmada deggan si loo samaysto ururka doorashada. Marka dadka doorashada ka qaybgelaya la soo sharaxo, xisbiyada laba ka mid ah ama kuwo badan ayaa waxay samaysan karaan isku duubnaan doorashada darteed ah (vaaliliitto). Ururada doorashadana iyagoo labo ah ama ka badan ayey waxay samaysan karaan hal liis oo ay ku wada qoran yihiin dadka doorashada uga qaybgelaya. Xisbiga, ama kooxda isku duubnaanta doorashada darteed ama liiska ka dhexeeya ururada doorashada, qolo waliba waxay doorashada u soo sharixi karaan ugu badnaan tirada golaha wakiillada ee degmada loo doorto oo buuxda iyo weliba kala bar kale. Wakiillada la doortaa waa 17 – 85. Tirada wakiillada la doortaa waxay ku xiran tahay tirada dadka degmada deggan.

Degmo walba dadka u sharaxan in la doorto magacyadooda waxaa la isugu geeyaa oo lagu qoraa liis warqad lagu daabacay, dadka musharaxiinta ahna waxaa la siiyaa lambarro ka bilaama lambarka 2. Liiska musharaxiinta magacyadooda la isugu geeyey waxaa kaloo ka muuqda xisbiyada isku duubnaanta doorashada sameeyey iyo ururada doorashada ee musharaxiintoodu hal liis wada leeyihiin. Waxaa kaloo warqadda ka muuqda xisbiyada aan xisbi kale isku duubnaan la samaysan iyo dadka musharixiinta ah ee liisaska guud ee ururada doorashada ee isutegey ka baxsan.

Liiska musharixiinta oo dhan lagu qorayo waxaa la sameeyaa 25.9.2008. Ka dibna dadka mushariiinta ah waxaa lagu qoraa diwaan ay ku qoran yihiin musharixiinta waddanka oo dhan.

4 Codeynta

Doorashada waxaa loo qabtaa iyadoo la qabanqaabiyo codeyn la soo hormariyey (ennakkoäänestys) iyo codeyn la codeeyo maalinta doorashadu jirto. Qofku wuxuu codeyn karaa wakhtiyada codeynta ee la soo hormariyey ama wuxuu codeyn karaa maalinta doorashadu jirto, laakiin labada marba lama codeyn karo. Sharciga dembiyada ayaa wuxuu dhigayaa inay dembi ciqaab leh tahay, haddii laba mar la codeeyo.

Maalinta doorashadu jirto ee la codeynayaa waa maalinta Axadda 26.10.2008 saa-cadaha u dhexeeya 9-20 (9 subaxnimo ilaa 8 fiidnimo). Qofka maalinta doorashadu jirto codeynaya wuxuu xaq u leeyahay inuu codkiisa ku rido degmada uu deggen yahay meesha ku taalla ee sida diwaanka codeynta ku qoran ah meesha uu codeyntiisa ku ridayo. Kaarka ogeysiinta (ilmoituskortti) ee qofka loo soo diro ee loogu sheegayo inuu xaq u leeyahay inuu codeeyo ayaa waxaa ku qoran degmada uu qofku codeynteeda xaq u leeyahay iyo meesha degmadaas ku taalla ee ay tahay inuu codkiisa ku rido iyo cinwaankeeda.

Wakhtiga codeynta ee la soo hormariyey (Ennakkoäänestys) wuxuu bilaabanayaa maalinta Arbacada 15.10.2008 wuxuuna ku eg yahay waddanka dibediisa maalinta Sabtida 18.10.2008, Finland gudeheedana wuxuu ku eg yahay maalinta Talaadada 21.10.2008. Meelaha codeynta la soo hormariyey lagu rido qaar ka mid ah wakhtiga lagu codeyn karaa wuu ka gaaban yahay sida kor lagu soo sheegay.

Meelaha codeynta la soo hormariyey ee lagu codeyn karaa waa:
1) waddanka gudihiisa meelaha guud ee codeynta la soo hormariyey waa boostoo-yinka intooda badan iyo meelo gaar ah oo ay degmadu u magacawdey inay yihiin meelaha codeynta lagu ridi karo,
2) Safaaradaha Finland waddanka dibediisa ku leedahay intooda badan,
3) isbitaalada iyo meelo ka mid ah waaxaha daryeelka sooshalka iyo xeryaha ci-qaabta (xabsiyada). Meelaha xeryaha ah waxaa codkooda ku dhiiban kara dadka meeshaas lagu daryeelo ama dadka meeshaas lagu hayo.
4) Maraakiibta Finland laga leeyahay ee waddanka dibediisa ku maqan wakhtiga Finland gudeheeda lagu qabanayo codeynta la soo hormariyey, markabka gudihiisa waxaa ku codayn kara shaqaalaha markabka ka shaqaynaya, haddii wakhtiga codeynta la soo hormariyey uu markabku waddanka dibediisa ku maqan yahay. Dadka aan shaqaalaha ahayn ee markabka saaran kuma codeyn karaan markabka gudihiisa.

Qofka xuquuqda u leh inuu codeeyo, meeshuu rabo oo ah meelaha guud ee codeynta la soo hormariyey oo waddanka gudihiisa ah ama dibediisa ah ayuu hore codeyntiisa ugu ridi karaa.

Qofka xuquuqda u leh inuu codeeyo, laakiin dhaqdhaqaaqiisu ama waxqabadkiisu ay xaddidan yihiin ilaa xad keenaya, in aanu si dhib la'aan ah u tegi karin meelaha codeynta ama meelaha codeynta la soo hormariyey, qofkaas iyadoo ay jiraan waxyaabo shuruudo ah waxaa suuragal u ah inuu wakhtiga codeynta la soo homariyey codeeyo isagoo jooga gurigiisa ku yaalla degmada uu ka tirsan yahay. Qofka isagoo gurigiisa jooga codeynayaa, waa inuu isu soo sheegaa guddiga dhexe ee doorashada ee degmadiisa ugu dambayn Talaadada 14.10.2008 intaan la gaarin saacadda 16 (4 galabnimo).

Qofka codeynayaa wuxuu codkiisa siin karaa oo keliya qof musharax ah oo ku qoran liisaska laysugu geeyey dadka isa soo sharaxay ee degmada uu ka tirsan yahay.

Codeynta waxaa lagu sameeyaa meesha codeynta loogu talagalay. Qofka co-deynayaa waa inuu shaqaalaha doorashada u caddeeyaa qofka uu yahay. Shaqaalaha doorashada ayaa warqadda codeynta siinaya qofka codeynaya. Qofka co-deynayaa warqadda codeynta ayuu ku qorayaa qofka uu codkiisa siinayo lambarkiisa. Hal qof oo keliya ayaad codkaaga siin kartaa. Qofka aad codkaaga siinayso lambarkiisa waxaad ku qoreysaa warqadda codeynta dhineceeda gudaha goobada ku taalla dhexdeeda. Warqadda codeynta wax kale oo calaamad ah kuma qoreysid. Warqadda codeynta waxaad wax ku qoreysaa adigoo ku jira qolka yar ee codeynta, qolkaasna halkiimarba hal qof baa ku jiri kara. Ka dib qofka codeynayaa warqadda codeynta wuu isku laabayaa, si lambarkii uu ku qoray aanu u muuqan. Ka dib qofka codeynayaa warqaddii codeynta oo uu isku laabay oo xiran ayuu u geynayaa shaqaalaha doorashada, si warqadda codeynta loo shaabadeeyo iyadoon cidina u jeedin waxaad ku qortay. Maalinta doorashada qofka codeynayaa warqadda codeynta oo la shaabadeeyey wuxuu ku ridayaa sanduuqa codeynta. Codeynta la soo hormariyey, qofka codeynayaa warqadda codeynta oo la shaabadeeyey ayuu wuxuu ku rideyaa baqshadda doorashada wuuna xirayaa. Markaad tegeyso meesha codeynta la soo hormariyey ama meesha codeynta, haddii aad wadato kaarka ogeysiinta, wuxuu fududeynayaa codeynta.

5 Faahfaahin dheeraad ah

Faahfaahin dheeraad ah oo doorashada ku saabsan waxaa laga helayaa guddiga dhexe ee doorashada ee degmada (kunnan keskusvaalilautakunta) iyo xafiiska diwaangelinta (maistraatti). Labadan meeloodba cinwaannadooda iyo lambarada telefoonadoodu waxay ku qoran yihiin kaarka ogeysiinta.

Waddanka gudiheesa meelaha guud ee codeynta la soo hormariyey ku yaallaan iyo waddanka dibediisa meelaha codeynta la soo hormariyey ku yaallaan iyo cinwaannadooda iyo wakhtiyada ay furan yihiin iyo diwaanka dadka doorashada isu soo sharaxay iyo waxyaabo kale oo doorashada ku saabsan waxaad ku arki kartaa wasaaradda garsoorka boggageeda doorashada www.vaalit.fi. Diwaanka dadka doo-rashada isu soo sharaxay waxaad arki kartaa wax yar ka dib marka maalinta Khamiista 25.9.2008 la sameeyo liisaska ay dadka doorashada isu soo sharaxay ku wada qoran yihiin. Wararka ku saabsan meelaha codeynta la soo hormariyeyna waxaad boggaga internetka ku arki kartaa laga bilaabo bisha Sibtembar bilowgeeda.

Wargelintan bisha Ogoosto 2008 ayaa lagu soo saarayaa wasaaradda garsoorka boggageeda internetka www.vaalit.fi, iyadoo sidoo kale ku qoran luuqadahan soo socda: Carabi, Isbeyn, Shiine, Faransiis, Thai iyo Turki.